



Muqdisho: Aug 31, 2024

## War Saxaafadeed

Waxaa wadatashiyo u socday Xildhibaanada Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee Dowlad-goboleedka Koonfur Galbeed (KGS), wadatashiyadaan waxa looga arrinsaday arrimaha Soomaaliya; gaar ahaan xaaladaha amniga iyo siyaasadda. Waxay xildhibaanada isku raaceen inaan shaki ka jirin in sharciyan Soomaaliya ay tahay Qaran caalamku aqoonsan yahay; xaqna u leh ilaalinta madaxbanaanida iyo wadajirka dhuleed si waafaqsan Dastuurka Federaalka KMG ee dalka.

Sida aynu wada ognahay, dagaaladii sokeeye ee dalka waxaa ku burburey dhammaan hey'adihii dalka uu lahaa, 20-kii ee la soo dhaafayna waxa la socdey dowlad-dhis ku salaysan nidaamka Federaalka iyo siyaasad ku dhisan wadatashi, wada-ogol iyo isu-tanaasul. Marxaladaha cusub ee amniga, siyaasadda iyo dowlad dhiska uu dalku hadda galay waxay abuureen xaalado kulansaday walaacyo sabab u ah wadatashi la'aan iyo in hoggaanka Dalku uu qaadayo tallaabooyin badan iyo go'aano qar iska tuur ah oo masiiri ah, kuwaasoo aanu u aragno iney yihiin kuwo halis ku keeni kara midnimada Dalka, nolosha dadka, xasiloonida siyaasadda, amniga iyo dowlad dhiska maadaama aan lagu sameyn wadatashi iyo wada lahaansho. Haddaba, xildhibaanaddu waxay qiimeeyeen xaaladaha hoos ku xusan:

1. Hab-dhaqanka siyaasadeed ee Hoggaanka Dalku waa mid sii kala fogeynaaya wadajirka dadka iyo midnimada dalka.
2. Hoggaanka Dalka waxa uu lumiyeey masuuliyadii kowaad ee ka saarneyd isu keenista dadka iyo kalsoonidii dadku ka qabi lahaayeen Dowladnimadda, sidoo kalena waxa uu ka gaabiyey hirgalinta qorshe dowladeedkii ku dhisanaa wadatashi, wada-ogol iyo isu tanaasulka si loo helo Soomaali midaysan kana wada shaqeeya dowlad dhiska, nabadda iyo horumarinta arrimaha dhaqaalaha/bulssada.
3. Soomaaliya waa dal ka soo kabanaya dagaalo sokeeye iyo colaado, waxaana la qaatay Dastuurka Federaalka KMG, nidaam dimoqraadi ah oo ku dhisan sarraynta sharciga, rabitaanka shacabka, kaasoo muwaadinka Soomaaliyeed xaq u siinayaa xorriyadda Kulanka, Bannaanbaxa, Cabashada iyo Codsii-wadareed iyadoo aan ogolaansho loo baahneyn, iyo Dowlad-goboleedyo xaq u leh qabsoomidda doorashooyin Heer Dowlad-goboleed sida uu qorayo Dastuurka Federaalka KMG Qodobka 120-aad iyo Dastuurada Dowlad-goboleedyada.
4. Madaxweynaha DFS waxa uu heshiisyo amni iyo difaac oo badan la galey Dowlado isdiidan, kuwaasoo aan la hor keeniin Golaha Shacabka, heshiisyadaasi oo aan aaminsannahay in ay ka dhalan kara halis khatarteeda leh.

5. Hoggaanka Dalku waxa uu gabey gaarsiinta iyo kaalmada adeegyada asaasiga ah ee looga baahan yahay deegaanada laga xoreeyey Alshabaab si dadka rayidka ay u helaan nolol iyo daryeel degdeg ah si la mid ah deegaanada kale ee dalka.

Haddaba, annagoo eegeyna walaaca & dareenka dadkeena ay qabaan iyo masuuliyad naga saaran amniga iyo xasiloonaada dadka iyo deegaanadaba:

1. Waxaanu si wayn u diidnay in colaadda caalamiga ah ee Wabiga Blue Nile oo horseedi kara dagaalo ka qarxa mandiqadan Geeska Afrika, waxyeelana ay soo gaarto dadka, loo soo raro gudaha Soomaaliya gaar ahaan deegaanada Koonfur Galbeed Somalia (KGS).
2. Waxaanu ugu baaqnay ummadda Soomaaliyeed in la ilaaliyo midnimada, nabadgelyadda iyo xasiloonaada dalka.

Ugu dambeyntii, waxaan ugu mahadcelineynaa guud ahaan shacabka reer Koonfur Galbeed iyagoo darufo nololeed oo aad u adag haystaan muujiyey karti, isku-tashi iyo geesinimo inay la dagaalamaan cadowga nabad-diidka ah ee Alshabab oo si xaq darro ah u banneystay nafta, maalka iyo xoolaha shacabka Soomaaliyeed. Waxayna ku bixiyeen maal iyo naf aan la soo koobi karin.

**Wa Bilaahi Towfiq**

